



Ururka XAQ-UDOOD

Barnaamijka Kobci naafada dalkaaga

Ee lagu soo bandhigayo xogta caruurta taasoo lagu abaabulayo dhismaha xarunta daryeelka caruurta baahiyaha gaarka ah qaba ee (karaama care center).

XAQ U DOOD



Ururka XAQ-UDOOD

Shaxda Tasmada Cutubyada

1	Hordhac.....	3
2	Xogta caruurta baahiyaha gaarka ah qaba oo kooban.....	Error! Bookmark not defined.
3	Aasaaskii ururka iyo sobobihii loo aasaay.....	3
4	Xogta caruurta baahiyaha gaarka ah qaba.....	4
5	Kala saarida noocyada naafanimo.....	4
5.1	Shaxda caruurta la diwaan galiyay iyo nooca naafanimadooda	4
6	Aasaaskii dugsi waxbarasho.....	6
7	Dhibaatooyinka caruurta autismka ah	9
7.1	Shaxda caruurta austismka.....	10
8	Xogta caruurta agoonta ah.....	12
9	Ardayda Inta heshay adeegyo caafimaad iyo cida usuuro galisay	14
10	Masuuliyada caruurta Cida gacanta ku haysa.....	16
11	Dhibaatooyinka hoy la'aanta ee haysata caruurta.....	18
12	Baahiyaha loo qabo inay helaan xarun dabooli karta adeegyadooda.....	20
13	Qaybaha kala duwan ee dhismaha xaruntani ka koobantahay	21
14	Habka qaadhaan ururineed ee lagu dhisikaro xarunta.....	22
15	Dhaqaalaha dugsigga iyo goobaha uu ka kala yimaado.....	23
16	Xogta caruurtani sidii ay ku timi iyo cidii kasoo shaqaysay.....	23
17	Gunnaanad	23
18	Xarunta iyo Xidhiidhka Ururka.....	24



Ururka XAQ-UDOOD

1 Hordhac.

- ❖ Waa barnaamij kor loogu qaadayo caruurta naafada ah ee ku dayacan dalka gudihisa
- ❖ Waa barnaamij lagu kobcinayo dhamaan adeegyada ay ubaahnyihiin ee kala ah

A. Adeega waxbarasho

B. Adeega caafimaad

C. Adeega dhaqan celineed

- ❖ Xaruntani waxa ay dabooli doontaa dhamaan adeegyada caruurta baahiyaha gaarka ah qaba ee ku filiqsan dalka gudihisa.
- ❖ Waa barnaamij saamayn ku leh cidkasta oo wax la baxaysa loona baahanyahay inay xambaaraan masuuliyada ka saaraan dadkooda nugul.
- ❖ Barnamijkan waxa lagu hagi doonaa nidaamka iskaa wax uqabso kaasoo tusaale inoogu noqon doona sidii bulshadu isku taakulayn lahayd taasoo ay ka qayb qaadan doonaan dhamaan bulshada qaybaheeda kala duwan.
 1. Baahida ay uqabaan inay helaan xarun dabooli karta adeegyada kala duwan ee ay ubahanyihiin
 2. Qaybaha kala duwan ee dhismaha xaruntani ka koobantahay
 3. Habka qaadhaan urrurineed ee lagu dhisikaro xaruntan
 4. Dhaqaalaha dugsiga iyo goobaha uu ka yimaado
 5. Xogta caruurtani sidii ay ku timid iyo cidii kasoo shaqaysay.

2 Aasaaskii ururka iyo sobobihii loo aasaay.

Xaq-udood waa urur khayriya oo udooda xaquuqda caruurta baahiyaha gaarka ah qaba. Waxaa la aasaasay 2013, ururkani waxa uu uqabtaa bulshada hawl laqabto ta ugu mudan taasoo ah dayactirka iyo daryeelka dadka nugul ee baahiyaha gaarka ah leh.



Ururka XAQ-UDOOD

3 Xogta caruurta baahiyaha gaarka ah qaba

Ururkani waxa uu xog ururin ku sameeyaa nolosha guud ee caruurta baahiyaha gaarka ah qaba eek u dayacan dalka gudihiiisa gaar ahaan gobolka awdal, taasoo uu ka diwaan galiyay 500 oo qoys caruurtooda oo qaba baahiyo kala duwan kuwaasoo ay udheertahay daryeel la'aan, hoy la'aan, waxbarasho la'aan iyo caafimaad daro.

4 Kala saarida noocyada naafanimo


Waxa uu ururku kala saaray 390 ka mid ah 500 ee qoys noocyada naafanimo ee ay qabaan waaana sidan.

4.1 Shaxda caruurta la diwaan galiyay iyo nooca naafanimadooda


	Lab	Dhidig	Wadarta	Boqolayda
Naafada Jirka (Physical Disability)	102	41	143	36.66%
Naafada Koritaanka (Development disability)	71	49	123	31.53%
Naafada Maskaxda (Mental disability)	59	43	102	26.17%
Cilado kale (Others)	16	6	22	5.64%
Tirada Guud	251	139	390	100%



Ururka XAQ-UDOOD



Jaantuska 1aad: Naafada Caruurta la baadhay: Labi yo Dhidig





Ururka XAQ-UDOOD

Jaantuska 2aad: Boqolayda Naafada Caruurta la baadhay.

5 Aasaaskii dugsi waxbarasho.


Ururku waxa uu aasaasay dugsi waxbarasho 2013 isaga oo ku bilaabay 20 caruura halka ay hada dhigtaan 86 caruura, taasoo mudada 12 ka sano ah uu dugsigaasi ku jiro guri kiro ah oo aanay wax ku baran Karin caruur baahiyaad kala duwan leh, iyadoo ay dhib ku dareemayaan ama aanu dugsiguba qaadayn 86 arday iyo 18 qof oo ah adeegayaasha dugsiga, dhibta ugu daran ee caruurta dugsiga ka haystaana ay tahay in iyadoo lagu gudo jiro sanad dugsiyeedkii ay dadkii guirgan mulkiyiisa lahaa ay ubaahdaan guroigoodii laguna khasbanaado in meel kale loo guuro, taasoo mar walba caqabad ku keenta geedi socodka waxbarasho ee caruurta iyadoo mudada 12ka sano ah uu dugsigaasi jiro uu ka guuray 6 goobood.

Ardayda dugsiga dhigata waxa u badan ardayda da'doodu u dhaxayso 12-17 Sano jir kuwaas oo dhan 43.02% halka ardayda tiro ahaan ugu yari tahay ardayda da'doodu ka wantahay ama tahay 18 jir kuwaas oo dhan boqolayda 4.65%.


Da'da	Lab	Dhidig	Wadarta
0_4	0	0	0
5_11	25	12	37
12_17	30	15	45
18+	3	1	4
Wadarta Guud	58	28	86



Ururka XAQ-UDOOD



Jaantuska 5aad: Ardayda Dugsiga Dhigata: Da'dooda iyo Tiradooda






Ururka XAQ-UDOOD

Jaantuska 6aad: Boqolayda Ardayda Dugsida Dhigata.

Shaxda 2aad: Da'da iyo jinsiga caruurta naafada ah.

Da'da	Lab	Dhidig	Wadarta	Boqolayda
0_4	31	18	49	12.56%
5_11	139	77	216	55.38%
12_17	73	42	115	29.48%
18+	7	3	10	2.56%
Wadarta	250	140	390	100%


Sida ku cad jaantuska 3aad iyo ka 4aad, waxa u badan caruurta naafada ah kuwa da'doodu u dhaxayso 5 sano ilaa 11 sano kuwaasi oo boqolayda noqonaya **55.38%**. Halka ay ugu yaryihiin caruurta da'doodu u dhaxayso 1 sano ilaa 4 sano taasi oo ka noqonaysa boqolayda **12.56%**.





Ururka XAQ-UDOOD

Jaantuska 3aad: Da'da iyo Boqolayda Caruurta Naafada Ah.



Jaantuska 4aad: Naafada Caruurta: Da'da Dhidig iyo Lab.

6 Dhibaatooyinka caruurta autismka ah


Waxa jirta caruurta autismka ah oo ah caruur dhibaato badan kala kulma bulshada eey ku dhex noolyihiin waalidkuna dhib badan kala kulmo. Takoorka bulshada kaga imanaya caruurta ee ay sobobtay aqoon la'aantu waxa uu cabsi galiyay waalidiinta caruurta dhalay, taasoo ay xal ka dhigeen inay caruurta ku xidhaan xadhko la soohay iyo silsilado. Caruurta waxay ay tiro ahaan ka yihiin caruurta xarunta ka diwaan gashan 28.2%.



Ururka XAQ-UDOOD


6.1 Shaxda caruurta austismka.

Da'da	Lab		Dhidig		Wadarta Labka xaalada daran iyo mida dhexdhexaadka ah	Wadarta Dhidiga xaalada daran iyo mida dhexdhexaadka ah	Wadarta Guud	Boqolayda %
	Dhexdhexaad (Moderate)	Daran (Severe)	Dhexdhexaad (Moderate)	Daran (Severe).				
0_4	1	4	1	2	2	6	8	2.05%
5_11	24	18	11	13	35	31	66	16.92%
12_17	17	6	9	4	26	10	36	9.23%
18+	0	0	0	0	0	0	0	0%
Wadarta	42	28	21	19	63	47	110	28.2%






Ururka XAQ-UDOOD



Jaantuska 7aad: Caruurta Autismka qaba: Xaalad daran iyo mid dhexdhexaad ah.





Ururka XAQ-UDOOD

Jaantuska 8aad: Boqolayda Ardayda cilada Autismku hayo.

7 Xogta caruurta agoonta ah

Caruurta xaruntani u qabato adeegyada waxa ka mid ah caruurta agoonta ah ee hadana naafonimadu u weheliso, waxaa xaruntan ku jira caruur ka kooban 78 caruura oo udhiganta 20% tirada 390 ka caruura ee la baadhay kuwaasoo la nool nolol aad uxanuun badan.


Dugsigu waxa uu ururiyay ardayad agoonta ah ee naafada ah, waxana uu ku xusay shaxdan hoose:

Da'da	Lab	Dhidig	Wadarta	Boqolayda %
0_4	3	1	4	1.20%
5_11	22	12	34	8.72%
12_17	26	14	40	10.26%
18+	0	0	0	
Total	51	27	78	20%


XAQ U DOOD



Ururka XAQ-UDOOD



Jaantuska 9aad : Caruurta naafada ah ee Agoomaha ah.



Jaantuska 10aad : Da'da Boqolayda Caruurta naafada ee agoomaha ah.



Ururka XAQ-UDOOD

Sida ku cad jaantuska 9aad iyo ka 10aad, caruurta naafada ah ee agoomaha ah waxa ugu badan caruurta da'doodu u dhaxayso 12-17jir kuwaasi oo ka ah boqolayda guud 10.26%.

8 Ardayda Inta heshay adeegyo caafimaad iyo cida usuuro galisay

Waxaan hospitalka wayn ee borama ka codsanay inay nagala qayb qaataan adeegyada caafimaad ee ay caruurtani ubaahanyihiin , waxaanay noo suuro galiyeen inay siiyaan todobaad walba adeeg caafimaad oo bilaasha qoysaska aan awoodayn inay caruurtooda geeyaan xarumo caafimaad taasoo maalinkasta oo arbaca ah aan ugaynaynay 5 caruura ururkuna fulinayay xidhiidhinta, dabagalka iyo joogtaynta dawooyinka iyo la socodka xaaladaha caafimaad ee ilmahan, iyadoo ururku kulamo bil le ah uu uqabto waalidiinta caruurtoodu caafimaadka martay anagoo fiiro gaara siinayna caruurta suuxdina leh sidii loogu joogtayn lahaa dawooyinkooda ilaa hada caruurta aan gaadhsiinay xarunta caafimaad tiradoodu waxa ay dhantahay 83 caruura.

Dhakhtarku waxa uu u kala saaray nuucyada naafada sida ku xusan shaxdan hoose:

1. Epilepsy and atonic seizure.
2. Mental illness (schizophrenia and encephalitis psychoses).
3. Muscular spastic and atrophy
4. Cerebral palsy (cp)
5. Development disorder.


Shaxda Caruurta naafada ah ee lagu daryeelay Dhakhtarka Wayn ee Borama.

Da'da	Lab	Dhidig	Wadarta
0_4	10	6	16
5_11	20	15	35
12_17	14	8	22




Ururka XAQ-UDOOD

18+	4	6	10
Wadarta	48	35	83




Jaantuska 15aad: Caruurta lagu baadhay caafimaadkooda dhakhtarka wayn ee Borama





Ururka XAQ-UDOOD



Jaantuska 16aad: Da'da Caruurta caafimaadkooda la baadhay

Jaantuska 15aad iyo 16aad waxa uu ku tusayaa tirada caruurta la baadhay caafimaadkooda inta ugu badan da'doodu waxay u dhaxaysaa 5 ilaa 11 jir taasi oo dhan 35 Caruur ah.

9 Masuuliyada caruurta Cida gacanta ku haysa.


Waxaan waraysiyo kala duwan la yeelanay waalidiinta gacanta ku haysa caruurta, sida ay noo sheegeen waalidiintu waxa iyagana masuuliyadoodu dhex ku dhacday caruurta burburka qoysku saameeyay ee naafada ah iyo caruurta la nool qaraabada ee aan la noolayn labada waalid midna kuwaasoo dhibaataada naafonimada ee ay la daalaa dhacayaani ay saamayn xoogan ku leedahay daryeelka waalid la'aantu. Caruurta waxa ay masuuliyadoodu daryeel iyo masuuliyadooda daruuriguba ku tiirsantahay hooyo waana sidan :

Masuulka	Tirada	Boqolayda %
Aabo	45	11.05%
Hooyo	296	88.50%




Ururka XAQ-UDOOD

Qaraabo	49	12.56%
Wadarta	390	100%



Jaantuska 11aad: Caruurta naafada ah cida masuulka ka ah.



Jaantuska 12aad: Boqolayda % cida masuulka ka ah caruurta naafada ah.



Ururka XAQ-UDOOD

10 Dhibaatooyinka hoy la'aanta ee haysata caruurta.


Dhibaatooyinka adag ee caruurta ka haysta hoygii lagu daryeeli lahaa kuwaasoo kasoo jeeda qoysas aad u danyara oo aan awoodayn inay guriyo kiraystaan, waxa kale oo ka mid ah caqabadaha qoysaska haysta caruurta naafada maskaxda ka ah in aan laga kirayn guryaha, taasina ay sobobto inay hareeraha magaalada ka samaystaan guryo yaryar oo ku meel gaadh ah oo aan lagu hayn Karin ilmo baahi gaara qaba iyagoo wajaha duruufo nololeed oo aad u adag. Halka qoysas qaar haysta caruurahan ay ku dul noolyihiin qoysas kale oo ehel ah iskuna dul dhibaataysan yihiin.

Shaxda hoyga qoysaska caruurta naafada ah.


Faalo	Tirada	Boqolayda
Qoysaska Guryo leh	117	30%
Qoysaska Kirada ku jira	122	31%
Qoysadka guryaha ku meel gaadhka ah.	151	39%
Wadarta	390	100%



Ururka XAQ-UDOOD




Jaantus 13aad: Qoysaska dagan guryo, kuwa kira ama ku meel gaadh ah





Ururka XAQ-UDOOD



Jaantuska 14aad: Boqolayda Qoysaska dagan guryo, kiro ama kuwo kumeel gaadh ah.

Marka la eego jaantuska 13aad iyo 14aad ee kor ku xusan, waxa muuqata in qoysaska haysta caruurta naafada ah ay dhanyihiin boqolayda 30% kuwa guryo leh. Halka kuwa guryo haysan ee kiro dhanyihiin 30% kuwo dagan ku meel gaadh ah waxay dhanyihiin boqolayda 39%.

11 Baahiyaha loo qabo inay helaan xarun dabooli karta adeegyadooda.

Hadaba markii aan caruurta kala saarnay xanuunadooda ayaa waxa aanu diwaan galinay adeegyada caafimaad ee ay ubaahanyihiin in loo qabto adeegyadaas oo ubaahan halkii lagu qaban lahaa waaana sidan:

1. 70 caruura ayaa waxay ubaahanyihiin wheelchair
2. 46 caruura ayaa waxay ubaahanyihiin kursiga (cp chair)
3. 55 caruura ayaa waxay ubaahanyihiin in loo dhiso paralalpairs ay socodka ku baranayaan
4. 122 caruura ayaa waxay ubaahanyihiin in loo sameeyo jimicsiyo kala duwan
5. 81 caruura ayaa waxay ubaahanyihiin in loo sameeyo hadal baris iyo xarakaad



Ururka XAQ-UDOOD

6. 12 caruura ayaa waxay ubaahanyihiin karaajyo gaar ahaan kuwa xusulada iyo kilkiilooyinka la gashado
7. 6 caruura ayaa waxay ubaahanyihiin in loo gudbiyo xarunta samayn caaga lugaha lagaliyo ee xoojiya dhaqaaqa iyo socodka
8. 26 caruura ayaa waxay ubaahanyihiin in lagu xidho balastar nuurada leh si loogu toosiyo meelaha qalooqa gaar ahaan lugaha
9. 5 caruura ayaa waxay ubaahanyihiin in loosoo iibiyo 5 xabo walking frame ah si loogu dhaqaajiyo socodkooda
10. 4 caruura ayaa waxay ubaahanyihiin in loo sameeyo kabo dalacan si dhererka lugahoodu isku leekaadaan
11. 26 caruura ayaa loo baahanyahay in loo gudbiyo dhakhtarada lafaha si baadhid buuxda loogu sameeyo loogana daweeyo xanuunada ay ka qabaan lafaha
12. 93 caruura Ayaan loo baahanyahay in loo gudbiyo dhakhtarada neerfaha iyo madaxa si baadhis loogu sameeyo xanuunadooda
13. 32 caruura ayaa loo baahanyahay in loo gudbiyo dhakhtarada caafimaadka guud si loo daweeyo xanuunada ay qabaan.

Hadaba markii aan ogaanay baahiyaha ay qabaan caruurtani in loogu adeegi Karin guri kiro ah ayaa waxa lama taabtaan ah inay xarun balaadhan oo ay ka helaan dhamaan adeegyadii ay ubaahnaayeen.

12 Qaybaha kala duwan ee dhismaha xaruntani ka koobantahay

Hadaba markii aanu daraasadaynay adeegyada ay caruurtani ubaahanyihiin waxaan ukala saarnay sadex qaybood

- A. Adeega waxbarsho
- B. Adeega caafimaad
- C. Adeega dhaqan celineed



Ururka XAQ-UDOOD

Adeegyadaasoo intuba ay daruuri uyihiin caruurta sidii ay uheli lahaayeen iyo meeshii ay ka heli lahaayeen.

Hadaba qaybaha caruntani waxa ay ka koobanyihiin anaga oo ku salaynayna baahiyaadkooda aan kor kusoo xusnay, xaruntuna waxay udhimsi doontaa sidan:

1. Qaybta waxbarashada
2. Qaybta cuntooyinka
3. Qaybta jimicsiyada (physiotherapy)
4. Qaybta hadal barista (speech therapy)
5. Qaybta maamulka
6. Qaybta xirfadaha (skills)
7. Qaybta laundry ga iyo storeka
8. Qaybta shaqaalaha
9. Qaybaha hurdooyinka ee caruurta adeegyada loo qabanayo.

13 Habka qaadhaan ururineed ee lagu dhisikaro xarunta.

Waxa aan baaq qaylo dhaan ah udiraynaa dhamaan.

- A. Haayadaha internationalka ah
- B. Haayadaha khayriga ah
- C. Haayadaha dawlaha
- D. Local NGOS
- E. Dhirkadaha waawayn ee dalka
- F. Ganacsada iyo dhamaan bulshada qaybaheeda kala duwan dal iyo dibadba.

Waxaan ugu baaqaynaa sidii looga wada qayb qaadan lahaa inay ubadkani helaan xarun ay leeyihiin oon cidi ka saarayn kana heli doonaan dhamaan adeegyada ay ubaahanyihiin



Ururka XAQ-UDOOD

Waxaa lama taabtaan ah oo aan indhaha laga qarsan Karin dhibaatooyinka ay la kulmayaan caruurta baahiyaha gaarka ah qaba ee dalkeena ku nool taasoo tirada caruurtani ay marba marka ka dambaysa ay aad usii kordhayso, waxaan marlabaad iyo mar sadexaadba ku adkaynaynaa in cidkastoo barnaamijkan ka qayb qaadanaysa in xogtaa aan soo bandhignay ay nala raadinayaa xalkeeda.

14 Dhaqaalaha dugsiga iyo goobaha uu ka kala yimaado

Dhaqaalaha dugsigan lagu wado mudada 12ka sano ah ma aha mid ka yimi haayado gargaar waa mid ku yimid masuuliyad iyo maamul wanaag taasoo bulshaduna qaybo laxaad leh kasoo qaadatay qaadhaanka dugsiga

Shaxda dhaqaalaha dugsiga:

20% gunada dawlada dhexe bixiso

16% gunada iyo shidaalada dawlada hoose ay ku kabana dugsigan

64% waxa uu ku yimaadaa qaadhaan bulshada dhexdeeda laga ururiyo

15 Xogta caruurtani sidii ay ku timi iyo cidii kasoo shaqaysay.

Xogtani kumay iman maalgalin ee waxa sababay in ururkani adeegyada uu uhayo bulshada nugul ay keentay inay abuurto kalsooni iyo saaxiibnimo dhow taasoo dadkan dhibaataysani markay heleen meel ay la wadaagi karaan dhamaan xogtoodo nololeed inay ku dhiiradeen inay bixiyaan warbixinta noloshooda. Hadaba dhamaanteen aan noqono saaxiibka dadkeena nugul aynu u istaagno gacmahana isku qabsano sidii aynu waxbadan uga badali lahayn nolosha dadkeena dhibaatayn

16 Gunnaanad

- ❖ Ururku waxa uu ku talinayaa in si bini'aadnimo leh loogu gurmado caruurtan maadaama waaliintoodu ay awdoodi waayeen inay wax baraan iyo inay daryeelaan, mida kale waxaan



Ururka XAQ-UDOOD

ognahay inay waxbarashadu tahay furaha nolosha isla markaana tahay furaha lagu yaraynayo faqriga iyo jaahilnimada, sidoo kalana ay tahay wadada lagu gaadhayo nolol wanaagsan iyo guul, waa in bulshada kawada qayb qaataan sidii kor loogu qaadi lahaa kaalintooda waxbarasho iyo midooda nololeed.

- ❖ Inay bulshadu ilnaxariis leh ku eegto kana qayb qaataan ololaha xuquuqda loogu raadinayo caruurta baahiyaha gaarka ah qaba, waxay ubaahanyihiin maalkiina, waxay ubaahanyihiin muruqiina, waxay ubaahanyihiin maskaxdiina.

17 Fiiro Gaar ah.

Xogtani waa hordhac, waxa xaqiijin iyo dib u eegis ku samayn doona iskana kaashan doona dhakhaatiir iyo bahda caafimaadka ee Jaamacada Camuud kuwaas oo soo saari doona xanuunka saxdaa ee ilmo kasti gabo iyo nuucyada dhakhaatiirta ay u baahanyihiin.

18 Xarunta iyo Xidhiidhka Ururka.

Xarunta guud ee ururka xaq-udood waxay ku taalaa magaalada borama, gaar ahaan xaafada sheikh ali jawhar. Waxa lagala xidhiidhi karaa wixii macluumaad guud iyo mid gaar ahba adressyadan hoos ku xusan:

Email: xaqudoodcharity13@gmail.com

Zaad : +252633193900

Edahab: 733522

Account number: 2103-63279331